IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

## EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 30ka Luulyo 1989 L. 1 R 7

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka l aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

K O O N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 17 ee 1 Juun, 1989, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'adda H/ta Caalamiga ah. Bog; 375

SHARCI L. 18 ee 1 Juun. 1989, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika. « 376

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 38 ee 1 Juun 1989, Meel-marin Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS S.H. Afrika. » 377

DECREE No. 38 on 1 Juun. 1989, Instrument ofratification » 378

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 39 ee 1 Jaan 1989, Meel_marin Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga ah. » 379

DECREE N. 39 on 1 Juun 1989, Instrument of ratification. » 380

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 40 ee 19 Juun 1989, Magacaabid Abbaanduulayaasha A.D.S. » 381

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 41 ee 25 Maajo 1989, Magacaabid Nootaayo. » 382

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 42 ee 5 Juun 1989, Magacaabid Nootaayo. » 383

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 43 ee 17 Juun Magacaabid Nootaayo. » 384

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 44 ee 25 Juun 1989, Magacaabid Nootaayo. » 385

XEER WASAARADDA GANACSIGA L. 13 ee 25 Maajo 1989, Xeer-Nidaamiyaha Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha. » 386

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 13 ee 28.6.89, Aqoonsi Ururka Naafada Jirka Soomaaliyeed. » 387

TALOOYIN ISGAARSIIN OGELSIIS IWM.

QAYBTA SAD/XAAD

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.7.89, Lumid Jeeg War. L. 0812603 ku qoran Maxamed Axmed Colow L. 162 » 388

MAXKAMADDA G. BANAADIR 5.7.89, Lumid Jeeg War. L. 1597813 ku qoran Abuukar Maxamed Caydaruus L. 163 » 389

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.7.89, Lumid Jeeg War. L. 1586399 ku qoran Maxamed Aw Jaamac Cabdi L. 164 » 390

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE 29.5.89, Lumid Jeeg War. L. 1453890 ku qoran Cabdalla Macallin Maxamuud L. 164/bis » 391

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.7.89, Lumid Buug Kayd L. 745 ku qoran Faaduma Xareed Idiris L. 165 » 392

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.7.89, Lumid Jeeg War. L. 0426709 ku qoran Xamarow Cali Isaaq L. 166 » 393
MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.7.89, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Fowsiya Mustafa Abuukar L. 167 » 394
MAXKAMADDA G. BANAADIR 22.7.89, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Aamina Sheekh Abuukar L. 168 » 395
MAXKAMADDA G. BANAADIR 22.7.89, Lumid Jeeg War. L. 0415193 ku qoran Axmed Maxamuud Maxamed L. 169 » 396
MAXKAMADDA G. BANAADIR 9.7.89, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cilmi Macallin Axmed L. 170 » 397
MAXKAMADDA G. BANAADIR 9.7.89 Lumid Jeeg War. L. 0425516 ku qoran Bashiir Cabdi Yuusuf L. 171 » 398
MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.7.89 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdulqaadir Maxamed Hilowle L. 172 » 399
MAXKAMADD AG. BANAADIR 17.7.89. Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Xuseen Maxamed Jimcaale L. 173 » 400
MAXKAMADDA G. BANAADIR 24.7.89 Lumid Jeeg War L 0438327 ku qoran Caasha Xaaji Xasan L. 174 » 401
MAXKAMADDA G BANAADIR 24.7.89 Lumid Buug Kayd L. 26773 ku qoran Bishaaro Muuse Cumar L. 175 » 402
MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.7.89 Lumid Jeeg War. L 0419607 ku qoran Aamina Muude Cusmaan L 176 » 403
MAXKAMADDA G. BANAADIR 5.7.89 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Atsuko Isoda L 177 » 404
MAXKAMADDA G. BANAADIR 9.7.89 Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Cabdiwaaxid Cismaan X Axmed L. 178 » 405
MAXKAMADDA G BANAADIR 29.7.89 Lumid 7 Jeeg War. ku qoran Ilyaas Cabdi Ibraahim L. 179 » 406

## QAYBTA KOWAAD
## SHARCI

Sharci lambar 17, taariikh 1.6.1989: Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga ha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

**Qod. 1aad**

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga ah, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan lacagta loo yaqaan SDR 14.700.000/=, looguna talo galay wejiga labaad ee Mashduuca climi baarista iyo horumarinta Daaqa Gobollada Dhexe ee Dalka.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Washinton ee Dalka Mareykanka.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

**Qod. 2aad**

Shuruudaha iyo xaalada ay ay tilmaamayaa Heshiiskan ku tilmaaman Qod. 1aad Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo sooyey inuu meelmariyo Heshiiskan.

**Qod. 4aad**

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 18, taariikh 1.6.1989: Oggolaansho heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kuna saabsan amaah lacageed oo aan ka badneyn lacagta loo yaqaan FUA 8 580 000/= (siddeedmalyan-shanboqol-siddeetankun), loo guna talo galay wejiga labaad ee Mashruuca cilmi baarista iyo horumarinta daaqa Gobollada Dhexe ee Dalka.

2 Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Abidjan ee Dalka Ivory Coast.

3. Heshiiskani wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay tilmaamayaan Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa la waafajinayaa dhaqangelintooda Dastuurka JDS.

Qod 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu meel-mariyo Heshiiskan.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

## QAYBTA LABAAD

## X E E R

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 38, taariikh 1.6.1989: Meelmarinta Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo Qod. 82 faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 17, ee 1da Juun 1989 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiskan;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

### Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika oo lagu kala saxiixday magaalada Abidjaan ee Dalka Ivory Coast, kuna saabsan maalgelinta wejiga labaad ee Mashruuca Cilmi-baarista iyo Horumarinta Daaqa Gobollada Dhexe ee Dalka.

### Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka JDS ku yeelanayaa awood sharci ah.

### Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree no. 38 of 1.6.1989: Instrument of ratification.

THEPRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution;

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN: The Law no. 17 of 1.6.1989 on the pase of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

the following Decree:

Article 1

The Loan Agreement the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Fund (Central Rangelands Reserch and Development Project -phase II), signed in Abidjan on Ivory Cost, is hereby retified.

Article 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 1.6.1989

THE PRESIDENT OF SDR
(Mohamed Siad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 39, taariikh 1.6.1989: Meelmarinta Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga ah.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 3 iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 18 ee 1da Juun 1989 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiskan;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Hsehiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga ah ee lagu kala saxiixday magaalada Washinton ee Dalka Mareykanka taariikhdu markay ahayd 9ka Febraayo 1989, kuna saabsan maalgelinta wejiga labaad ee Mashruuca Cilmi-baarista iyo Horumarinta Daaqa Gobollada Dhexe ee Dalka.

Qod. 2aad

Heshiiskan waxa uu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya awood sharci.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynuhu, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho,1.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree no. 39 of 1.6.1989: Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution;

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN: The Law no. 18 of 1.6.1989 on the base of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The neccessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

The following Decree:

Article 1

The Development Credit Agreement (Central Rangelands Research and Development Project-phase II), between Somali Democratic Republic and International Development Association, signed at Washington, D.C., on February 9, 1989, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 1.6.1989

THE PRESIDENT OF SDR
(Mohamed Siad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 40 19 Juunyo 1989: Magacaabid Abbaanduulayaasha X.D.S.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: L. 9aad ee Qod. 82aad Dastuurka J.D.S. iyo Beddelaaddii ka dambeysay;

ISAGOO ARKAY: Xeer L. 17 ee 28 Maarso 1989 ee ku saabsan Dib u habeynta Qaab Dhismeedka Wasaaradda Gaashaandhigga;

ISAGOO ARKAY: Sharci L. 15 ee 6dii Abriile 1960kii kuna saabsan «Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed»;

ISAGOO ARKAY: Xeer L. 18 ee 28 Maarso 1989 ee ku saabsan Magacaabidda Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed;

ISAGOO AQOONSADAY In ay tahay lagama maarmaan in loo Magacaabo Abbaanduulayaal Taliska X.D.S. isla markaasna ah Taliye Xigeenada Taliyaha X.D.S;

ISAGOO TIXGELIYEY: Ra'yiga Wasiirka Gaashaandhigga.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Sarreeye Guuto Maxamed Saalax X. Axmed, waxaa loo Magacaabay Abbaanduulaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed, Arrimaha Taakuleynta.

Sarreeye Guuto Maxamed Aadan Axmed, waxaa loo Magacaabay Abbaanduulaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed, Arrimaha Hawl-gelinta.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxaa dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 19 Juun 1989

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 41 ee 25 Maajo 1989: Magacaa-bid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARPAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lr. 8 ee 15.12.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.1962 kuna saabsan Hawsha nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee sharciga lam. yahay 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah iyo tartan la'aan u magacaawo nootaayo qofkii mudan;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Jaalle Prof. Nuur Cali Gacal waxaa loo magacaabay nootaayo, wuxuuna hawshiisa nootaayo ku fulinayaa magaaladan Muqdisho.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 25.5.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 42 ee Juunyo 1989: Magacaabid Notaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.1962 oo ku saabsan habeynta hawlaha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 7 ee 2.2.1986 ee ku saabsan Mihnadda Nootaayada;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharci lr. 7 ee soo baxay 2.2.1986, laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaalle Dr. Cabdisalaan Xaaji Cali Warsame waxaa lagu magacaabay Notaayo Xamar.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5.6.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS, L. 43 ee 17 Juunyo 1989: Magacaabid Notaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.1962 kuna saabsan hawlaha Notaayada;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga lr. 7 ee 2.2.1986 oo Awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah u magacaabo Notaayo qofkii mudan;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Jaalle Dr. Maxamed Maxamuud Afrax waxaa loo magacaabay Notaayo Xamar, wuxuuna hawshiisa Notaayonimo ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17 Juun 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 44 ee 25 Juunyo 1989: Magacaa- bid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

ASAGOO ARKAY: Sharciyada lr. 8 ee 15.12.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.1962, kuna saabsan hawsha nootaayada;

ASAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga lr. 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah iyo tartan la'aan u magacaabo nootaayo qofkii mudan;

ASAGOO ARKAY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Jaalle Dr. Cabdullaahi Ciyow Cali waxaa loo magacaabay nootaayo wuxuuna hawshiisa nootaayo ku fulinayaa magaaladan Muqdisho.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25.6.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA GANACSIGA L. 13 ee 25.5.1989 Xeer-nidaamiyaha Faleenka iyo Xabkaha.

WASIIRKA WASAARADDA GANACSIGA

MARKUU ARKAY: Sharci lr. 10 ee 26.1.1989, kuna saab-sanaa ka ganacsiga Falleenka iyo Xabkaha;

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 12 ee 26.9.1964, kuna saab sanaa Nidaamka Ganacsiga Dibedda;

MARKUU GARAWSADAY: Lagama maarmaanta in Sharciga Fasaxidda ka ganacsiga Falleenka iyo Xabkaha loo sameeyo Xeer-Nidaamiye.

WUXUU SOO SAARAYAA XEER-NIDAAMIYAHAAN:

Qod. 1aad

Waxaa la fasaxay in qof kasta ama Hay'ad kasta oo degane ah buuxisayna shuruudaha looga baahan yahay ganac-sadaha, ay ka ganacsan karto dalka gudihiisa una dhoofin karto dibedda Meydiga, Beeyada iyo Xabkaha kale.

Qod. 2aad

Sicirada ugu yar iyo habka lagu dhoofinayo badeecada-ha ku xusan Qod. 1aad ee Xeerkan waxay noqon doonaan habka kuwa ay xaddida Wasaaradda Ganacsiga, sida badee-cadaha kale ee dibadda dalka uga dhoofa.

Qod. 3aad

Marka dibedda loo dhoofinayo badeecadaha ku xusan Qod. 1aad ee Xeerkaan waxaa reeban in laga been sheego ti-rada, nooca iyo tayada badeecadaas iyadoo qasadku yahay in dibedda loo xawilo hanti aan Dawladdu la socon.

Qod. 4aad

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta la saxiixo, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 25.5.1989

WASIIRKA WASAARADDA GANACSIGA

(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 14 ee 28.6.1989: Aqoonsi Ururka Naafada Jirka Soomaaliyeed.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuurista Ururada noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qodobka 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo Aqoonsaday Ururka Naafada Jirka Soomaaliyeed oo ah Urur Samafal oo Ujeeddadiisu tahay raadinta Mashaariic, Abuurid meherado Shaqo Naafada Jirka, Warshado yar yar oo soo saara Qalabka Naafadu Dhaq dhaqaaqooda u Adeegsadaan, iyo Xarumo Dhaqan celineed oo Caafimaadkooda Guud iyo Xubnahooda dhimanba lagu daryeelo iyo Xarumo lagu Baro Xirfado kala duwan.

Qodobka 2aad

Ururku wuxuu Saldhiggiisa noqonayaa Magaalada Muqdisho, wuxuuna Laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo Degmooyinka.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 28.6.1989

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalle)

SOMALI PHYSICAL DISABLED ORGANIZATION

Objectives:

The organization is a voluntary organization. Its objectives includes organizing and development of the disabled, in order to help them sustain self-reliance.

The major objectives of the organization include:

1. To participate in the development process for the Somali people.

2. To encourage and train disabled people how to exploit the national resources of their country.

3. To prepare projects for cooperatives and groups, in order to make them productive to improve their living conditions.

4. To seek support and financial assistance from Somali society and foreign voluntary organizations, so as to execute its objectives.

5. To bring the attention of Somali society to the conditions of living, socio-economic situation of the disabled and make aware that the society is the poineers of the their disabled in various aspects i.e. economic, health and morale.

6. To develop relationship and become member with organizations for disabled in Africa, Arab league countries as well as other organizations in other parts of the globe.

7. To improve and coordinate economic and technical assistance for developing the organization.

8. To represent the interest of the disabled, and coordinate with voluntary organizations in and outside the country.

9. To create employment opportunities for physically disabled.

10. To develop and execute small-scale mostly hand-operated industries. These includes industries for manufacturing the equipment facilitating movement of disabled.

11. To create general health rehabilition centres and provide them with skills according to individual abilities.

12. To mobilize the support and cooperation of the national welfare council, Interior Ministry, Ministry of Labour and Social Affairs and other who are involved in the social welfare.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Sheekh Cumar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0818603 lagana sameeyey Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Axmed Colow sida ku cad warqadda lam. 5701 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0818603 lagana sameeyey Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Maxamed Axmed Colow.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Maxamed Sheekh Cumar lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 162

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ibraa. him Axmed **Xasan;**

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1597813 lagana sameeyey Laanta Jilib ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Abuukar Maxamed Cay. daruus sida ku cad warqadda lam. 6790 ee Bangiga Ganacsi. ga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1597813 lagana sameeyey Laanta Jilib ee Bangiga Ganacsiga iyo Kay dka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Abuukar Maxamed Caydaruus.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Jilib ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa. liyeed in ay siiso Jaalle Ibraahim Axmed Xasan lacagta ca. dadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga **keenin.**

Muqdisho, 5.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 163

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cusmaan Xaashi Raage;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1586399 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Aw Jaamac Cabdi sida ku cad warqadda lam. 7116 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X. Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1586399 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed AwJ aamac Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Cusmaan Xaashi Raage lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah eeJDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 164

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE MARKA

LAM. 49/89, BG.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. SH/HOOSE

MARKUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Jeegga War. Lam. 1453890, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka, kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 100.000 (Boqol Kun) Shilin, uuna lahaa Cabdalla Macallin Maxamuud, sida ku cad warqadda lam. yahay 000244, Tr. tahay 25.5.89, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharci Lam. yahay 9 ee Tar. 11.9.1965 No. 2.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lam. yahay 1453890, kuna qoran magaca Cabdalla Macallin Maxamuud, ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 (Boqolkun).

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka u bedde'o Jaalle Cabdalla Macallin Maxamuud, Jeegga kor ku tilmaaman, una sameeyo mid la mid ah ka dib markii ay ka soo wareegto muddo 30 casho gudahood maalinta go'aankan lagu qoro Faafinta Rasmiga ee JDS, haddii inta ka horreysa aan laga keenin wax ishortaag ah.

Marka, 29.5.1989

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. SH/HOOSE
(Xaaji Saylac Sheekh Cumar)

L. 164/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faadumo Xareed Idiris;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lr. 745 lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 187.067.03 kuna qoran magaca J.le Faadumo Xareed Idiris sida ku cad warqadda lam. ——— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lr. 745 lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 187.067.03 kuna qoran magaca Faadumo Xareed Idiris.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Faadumo Xareed Idiris lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 187.067.03 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horrey sa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 165

MAJKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xamarow Cali Isaaq;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0426709 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Somali Airlineys sida ku cad warqadda lam. 6789 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0426709 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca Somali Airlineys.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta **Xarunta** ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xamarow Cali Isaaq lacagta cadad keedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeeg War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax

Muqdisho, 6.7.1989

ishortaag ah laga keenin.

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 166

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Fowsiya Mustaf Abuukar;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 3 Jeeg War. oo Lambarradoodu ay kala yihiin sidatan:-

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | Laanta |
|---|---|---|---|---|
| 1253615 | 100.000 | Somali Airlines | | W/weyn |
| 1253616 | 100.000 | » | » | » |
| 1253617 | 100.000 | » | » | » |

lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca Somali Airlines sida ku cad warqadda lam. 7119 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku tilmaaman lagana sameeyey Laanta W/weyn ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto dhammaan lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca Somali Airlines.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laanta W/weyn ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Fowsiyo Mustaf Abuukar lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalintag o'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 167

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Aamina Sheekh Abuukar;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 3 Jeeg War. ee Lambarradoodu ay kala yihiin sidatan:-

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 1615856 | 100.000 | Aamina Sheekh Abuukar | | | 1/Xamar |
| 1615857 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1615858 | 100.000 | » | » | » | » |

lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna wada qoran magaca Aamina Sheekh Abuukar sida ku cad warqadda lam. 1307 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo-maaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku tilmaaman lagana sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Ban-giga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca Aamina Sheekh Abuukar.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Aamina Sheekh Abuukar lacag-ta cadadkeedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horrey-sa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 168

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Maxamuud Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0415193 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamuud Maxamed sida ku cad warqadda lam. 7306 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0415193 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 300.000 kuna qoran magaca Axmed Maxamuud Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Axmed Maxamuud Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegt muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 169

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cilmi Macallin Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. Lam. 0395993-0394434 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 iyo Sh.So. 240.000 kuna qoran Somali Airlines sida ku cad warqadda lam. 6788 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0395993-0394434 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud lacag dhan Sh.So. 540.000 kuna qoran magaca Somali Airlines.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cilmi Macallin Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 540.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 170

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Bashiir Cabdi Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0425416 lagana sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca Bashiir Cabdi Yuusuf sida ku cad warqadda lam. 5627 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0425416 lagana sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 300.000 kuna qoran magaca J.le Bashiir Cabdi Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Bashiir Cabdi Yuusuf Lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 14 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu dcbaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 171

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Hilowle;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga War. lam. 1610249-1575500 lagana sameeyey Laamaha 3aad Xamar iyo Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 isugeyn Sh.So. 200.000 kuna kala qoran magacyada Maxamuud Maxamed Nuur iyo Maka Maxamuud Xasan sida warqadda lam. 6725 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (OAmmortamento) Jeegagga War. lam. 1610249-1575500 lagana sameeyey Laamaha 3aad Xamar iyo Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto midkiiba Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200 000 kuna kala qoran magacyada Maxamuud Maxamed Nuur iyo Maka Maxamuud Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha 3aad Xamar iyo Wardhiigley in ay siiyaan J.le Cabdulqaadir Maxamed Hilowle lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200 000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka badnayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 172

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xuseen Maxamed Jimcaale;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. lam. 0351663—0351665 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto min Sh.So. 500.000 isugeyn Sh.So. 1.000.000 kuna qoran maga:a Jle Xuseen Maxamed Jimcaale sida ku cad warqadda lam. 7113 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0351663—0351665 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan Sh.So. 1.000.000 kuna qoran magaca Xuseen Maxamed Jimcaale.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xuseen Maxamed Jimcaale lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 173

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Caasha Xaaji Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0438327 lagana sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Caasha Xaaji Xasan sida ku cad warqadda lam. 7371 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortameto) Jeeg War. Lr. 0438327 lagana sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Caasha Xaaji Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Caasha Xaaji Xasan lacagta ca_dadkeedu yahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka harreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 174

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Bishaaro Muuse Cumar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lr. 26773 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag qoran Sh. So. 103.161.88 kuna qoran magaca J.le Bishaaro Muuse Cumar sida ku cad warqadda lam. 0324 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag qoran Shs. 103.161.88 kuna qoran magaca Bishaaro Muuse Cumar.

Muqdisho, 24.7.1989

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Bishaaro Muuse Cumar lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 103.161.88 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 26773 aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 175

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDDU ARKAR: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aamina Muude Cusmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0419607 lagana sameeyey Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 300.000 kuna qoran magaca warqadda lam. 2153 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0419607 lagana sameeyey Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca Aamina Muude Cusmaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Aamina Muude Cusmaan lacagta cadad keedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 176

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Siyaad Maxamed Mursal;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. ee lam. 0984197—0984200 lagana sameeyey Laanta Q/X/Caalamiga ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 midkiiba kuna qoran magaca J.le Atsuko Isoda sida ku cad warqadda lam. 6791 ...giga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliy d K.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. 0984197—0984200 lagana sameeyey Laanta Q/X/ Caalamiga ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Atsuko Isoda.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Q/X/Caalamiga ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayd Ka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Siyaad Maxamed Mursal lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 177

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdiwaaxid Cismaan X. Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 5 Jeeg War. oo Lambarradoodu ay kala yihiin sidatan:

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1428941 | 100.000 | Cabdiwaaxid | Cismaan | X. | Axmed | 5aad |
| 1428942 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1428943 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1428944 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1428945 | 100.000 | » | » | » | » | » |

lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Cabdiwaaxid Cismaan X. Axmed sida ku cad warqadda lam ——— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis—Guud;

HADDUU ARKAY: Qod 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku xusan lagana sameeyey Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto dhammaan lacag dhan Sh So 500.000 kuna qoran magaca J.le Cabdiwaaxid Cismaan X. Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdiwaaxid Cismaan X. Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 9.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr Cabdullaahi Axmed Xaashi)

T. 178

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

### GUDDOOMIYAHA MGB

**HADDUU ARKAY**: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ilyaas Cabdi Ibraahim;

**HADDUU TIXGELIYEY**; In ay dhumeen 7 Jeeg War. ee Lambarradoodu kala yihiin sidatan:

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 1670721 | 100.000 | Ilyaas Cabdi Ibraahim | W/dhiigley |
| 1670722 | 100.000 | » » » | » |
| 0375472 | 100.000 | Shariif Cabdalla Mudir | Baraawe |
| 1548111 | 100.000 | C/qaadir Ismaaciil Axmed | 4/Xamar |
| 0879004 | 50.000 | C/laahi Sh. Maxamed | 3/Xamar |
| 0857382 | 50.000 | Nuur Cali Shire | G/kacyo |
| 0803730 | 50.000 | Axmed Cali Xuseen | 5/Xamar |

lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 550.000 kuna qoran magaca mid walba ku hor yaal sida ku cad warqadda Lr 7590 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis—Guud;

**HADDUU ARKAY**: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee Lambaroodu kor ku xusan yihiin ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 550.000.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J/le Ilyaas Cabdi Ibraahim lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 550.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan kana yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 179

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Saleebaan Maxamed Cabdi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. L. 1597731-1551441 laga sameeyey Laamaha Jilib iyo Baydhabo ee Bangiga Ganacsiga & K. Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran Maxamuud Xalane Faarax iyo Faarax Khayre Bargaal sida ku cad warqadda lam. 6340 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War Lam. 1597731—1551441 lagana sameeyey Laamaha Jilib iyo Baydhabo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna kala qoran Maxamuud Xalane Faarax iyo Faarax Khayre Bargaal.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Saleemaan Maxamed Cabdi lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000 oo ah beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.6.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 180